

War Saxaafadeed

Macluushii weli way Jirtaa, Inkastoo la Arkay Waxogaa Kobac ah oo ka yimid Kaalmada Isdaba Joogga ah

Nairobi/Washington, 18 bisha November- Falanqeyntii dhawedy oo aay sameeyeen Hayadaha Badbaadda cuntada iyo nafaqda iyo tan ka sii digista Macluusha waxay xaqiijineysaa iney Macluushu ka sii jiri doonto Dad yooqga hab nololeedka ku dhisanyahay beero iyo Xoolaha ee Gobolka Shabeellaha Dhexe iyo Barakacayaasha ku nooll Afgooye iyo Mogadisha.

Halka Gobollada, Bay, Bakool iyo Shabeellaha hoose oo Horey loogu qiimeeyey Xaaladd Macluuleed, ee wijiiga- 5aad, iyadoo la adeegsanayo-IPC, Kaalmadii bani'aadannimo oo ballaarnayd waxaay fududeysay xaaladdii darneyd ee cunta yarida, isla markaana yareysey heerka dhimashada. Sidaa daraadeed Gobolada waxaa hoos loogu dhigey wijiiga- 4aad ee xaalada cuntiyarida deg dega bilaha November and December ee sanadka 2011, iyadoo la adeegsadey Habka kala qeybinta cuntayarida (IPC). Xaaladdu si kastaba ha ahaatee, dad ku dhaw 250,000 ayaa u muuqda iney soo wajahdey Xaaladd Macluul oo deg deg ah, Xaaladd Guud ee nafaqa darrada (GAM) ayaa weli ku dhaw ama ka sarreysa heerka macluusha in ka badan boqolkiiba soddon (> 30%) Gobollo badan, iyadoo aay wehliso heerka dhimashada gaar ahaan carruurta oo weli aad u sarreyso, tasoo aay sababtay sii socoshada cudurada faafa sida Jadeecada, shuban biyoodka iyo Duumada. Tobannaan kun oo qof ayaa geeriyooday illaa iyo bishii afaraad (april) ee sanad kan, waxaana la filayaa iney dhimashadani sii socoto bilaha soo socada. Guud ahaan ififaalaha Kasoo baxay xaaladda cunta yarida waxay weli tahay tii ugu xumayd ee soo marta dunida iyo tii ugu dareyd Soomaliya laga soo bilaabo Macluushii 1991/92. Sii socoshada Kaalmada bani aaddannimo oo dhinacyo badan leh ayaa lagama maar maan ah, wax kasta oo carqaladeynaya kaalmada bani aaddannimo ama Ganacsiga wuxuu sababayaa ku noqoshada Macluusha.

Xaaladda Macluusha ee ka jirta Koonfurt Somalia waxaa ugu waaweyn laba sababood . Tan koowaad, bi'itaankii wax soo -saark beeraha ee xiligii Deyrta ee bisha October-December' 2010 iyo wax soo saarka xilligii Guga ee bilaha (April -June) 2011, oo aad u liitey sababayna wax soo saarkii ugu hooseeyey muddo 17 sanadood ah, dhimasho xoolaad oo badan iyo qiimihii cuntada oo aad u kacay. Tan labaad, Kaalmada bini'aadannimo ee koofurta Soomaliya oo ahayd mid kooban illaa la soo gaarey bisha 9aad/10 aad (September-October), Taasoo sababtay sababo dhowr ah, sida Kaalmada b caalamka oo yareyd iyo dhaqdhaqaaqa howl-qabadka bani'aadannimo oo yareyd. Laga soo bilaabo bishii 9aad (September), qulqulka kaalmo ballaaran oo cunto deeq ah oo gashey suuqyada, ayna wehliso wax -soo- saarkii firileyda ee xilligii Guga iyo kii xilli dhaafka ahaa ee ka dambeeyey, waxay keentey iney hoos uga dhacdo qiimaha cuntada halkii aay gaartey bishii 6-7aad (June-July) 2011, hase yeeshee waxay weli ka sarreyan qiimihii aay gaartey sanadkii ugu dambeeyay iyo qiimaha celceliska ee shantii sano ee ugu danbeysay dhamaan suuqyada koonfurta . Marka laga reebo Gobolka shabellaha hoose, kaasoo ugu balaarnaa hoos u dhaca qiimaha firileyda(galley iyo Massagba) iyo goosashada xilli dhaafka oo Badneyd, weli isweydaarsiga daqliga xoogga iyo firileyda(massago, Galley) iyo xoolaha iyo firileyda, waa hooseeyaa.

Gargargaarka degdegga ee ballaarnaa siina kordhayey laga bilaabo bisha 9-10aad (September-October) wuxuu sameyn macno leh ku sameyay Nafaqa darrada ba'an iyo dhimashada labadab. Tusaale ahaan, Gobollada Jubooyinka, celceliska nafaqa darrada guud (GAM) dhicitaankeeda Gebi ahaan hab nololeedyada waxay hoos u dhacday soddon iyo shan dhibic shan boqolkiiba (35.5%) bishii 7-aad (July), gaartayna labatan iyo sagaal dhibic seddex boqolkiiba(29.3) bishii tobanaad (October). Hoos u dhacyo muhiim ah ayaa iyana lagu arkay Gobolka Bay iyo Barakacayaash Mogadishu, sidoo kale heerka dhimashad guud hoos ayuu u dhacay meelo badan. Si kastaba ha u soo hagaagtee, heerka nafaqa darro ee waqtigan iyo dhimashad guudba waxey weli ku sugan yihiin labo illaa afar jeer inay ka sarreyaan marka la bar dhigo heerarka caadiga ee Somaaliya waqtigaan oo kale sanadkii hore. Heerka dhimashada ee carruurta ka yar shan sano waxuu ka sarreyyaa lix jeer heerka caadiga ee u salka ah dalalka sahara Africa.

Odorisidda ugu suura galsan mustaqbalka, Macluul lama filayo iney siijirto sanadka inagu soo foodda leh ee 2012, marka laga reebo suuragalnimada macluusha ee qeybo ka mid ah dadk Barakacayaasha ah. Si kastaba ha ahaatee, marka la tixgeliyo saameynta macnaha leh oo aay macluushii sanadkan 2011 ku sameysay hab nololeedyada, caafimaadka, helitaanka iyo keydka firileyda (Galley, Massago), daahida iyo rajeynta qiyaas ka hooseysa celceliska dalag goosasho ee xilligii Deyrta 11/12, waxaa aad u suura gal ah meelo badan oo ka mid ah koofurta Somaliya iney ku waaraan wejiga afaraad ee cunta yarida xaaladda deg dega ah, illaa laga gaarayo bisha 8-aad(August) 2012 ee xilligii goosashada Guga. Heerka cuntayarida deg -dega ah waxaa qeexa, cunto yari ballaaran ee goyska, dhicitaanka nafaqa darrada guud (GAM) oo ka sara marta shan iyo toban boqolkiiba (GAM >15 %), iyo heerka dhimashada guud oo kor u kaca, gaarana dhimash hal qof, tobankii kun oo qofba maalintii (CDR >1/10,000/day). Cabirka dadka u baahan kaalmada xaaldda deg degga ah si loo bad baadiyo naf iyo hab nololeedka labadaba, waxuu mustaqbalka dhaw ku sugan doonaa in ku dhow heerka waqtigan (4 million oo dad ah), sagaalka bilood ee soo socota. Waxaa taa weheliya , halis heer ballaaran ee dillacidda cudurrada faafah oo jirta, taasoo keeni karta dhimasho heerara sare gaarta lana xiriirino xaaladda nafaqa ee carruurta ku nool Gobollada koofureed oo aan sugneyn.

Socoshada gargaarka ballaaran ee bini aaddannimo oo dhinacyo badan leh waa laga maarmaan si looga hortago korodhaka dhimasho iyo Kaalmeynat hab nololeedyada, gaar ahaan goysaska danyarta ah ee ku nool hab nololeed isku dhafka beero- xoolo dhaqatada. Inkastoo fursadaha Kaalmada bani aaddannimo aay walaac ku jirto, ganacsiga badarka (massgo, Galley) iyo tan kaalmada loo siiyo ee ku socota suuqada guud koofurta ayna wehliso qiimahii oo dhaceeda, waxay si cad u muujiyeen Horumarka suuqyada Somaliya, taasoo tilmaameysa sii socoshada kaalmad ku saleysan wax kala iibsiga suuqa (sida, lacag / boonada, lacageyn) iney yihiin habab muhiim ah oo waxtar leh si loo hagaajiyo sugnaanta cuntada , xataa meelaha aay gelidoodu adag-tahay.

FSNAU and FWES NET waxay sii wadi doonaan kormeerka xaaladaha iyo Maxsuulkooda, dib u tayeynta falanqeynta, iyo siinta xogta iyo warbixinada waqtigan iyo tan mustaqbalka ee heerka sugnaan la'aanta cuntada iyo Nafaqda. Xogta cusub ee beerista xilligan waxaa la shaacin doonaa bisha 12aad (December) ee sanadk 2012 iyo odorosidda wada jirka ee illaa bisha lixaad (June) ee sanadka 2012, waxaa la shaacin doonaa aakhirka bisha koowad (Janaayo) 2012 taasoo daba socon doonta daraasadda sugnaanta cuntada iyo nafaqada. Xog-taa oo dhanna waxaad ka heli kartaa shabakaddaha www.fsnau.org and www.fews.net



USAID
FROM THE AMERICAN PEOPLE

